



www.bookbite.org.uk

Bookbite

Hagaha...

baarista taariikhda deegaankaaga

MEESHA LAGA BILAABI KARO

Maktabadda deegaankaaga waa meel fiican ee laga bilaabo. Badankooda waxay qabaan dokumentiyo taariikh la xiriira, sheeko laga jeray wargeysyada iyo sawiro. Waxaad u baahan kartaa inaad qaban-qaabiso in aad aragto, sidaa awgeeda waxaa fiican inaad wacdo maktabadda, ama eeg boggooda internetka.

Waxa taas dheeraad u ah, magaaloyinka ugu wayn iyo xukumadaha deegaanka waxay qabaan xafiiska diwaanka ama maktabadaha daraasadda deegaanka. Waxay badanaa soo daabacaan hagahooda baarista, waxayna keydiyaan dokumentiyo deegaan oo badan iyo rasmi ah, ay ku jiraan:

- Diiwaanada kaniisadda iyo xukumada deegaanka
- Warqadaha iyo maabyada dhulka
- Diiwaanka ganacsiyada deegaanka, kooxyada iyo ururyada
- Diiwaanada sharciga
- Xasuus-qoryada shakhsiyaadka
- Natijoyinka tiro-koobyada
- Waxyaabo taariikh xiriir la leh ee la daawan karo ama la dhegeysan karo
- Wargeysyo

Maktabaddaada ama xafiiska diwaanka wuxu xittaa kuu sheegi karaa wax ku saabsan ururyada taariikhda deegaanka, koorsooyin iyo daabacado.

BOGAGGA INTERNETKA TAARIIKHDA DEEGAANKA

www.nationalarchives.gov.uk/localhistory/guide

Meel lagu keydiyey macluumaad taariikh ahaan xiiso leh – laga bilaabo meelaha laga soo saro dhuxusha, webiyada, dekadaha, saldhigyada

tariinka iyo shirkadaha maraakiibta wax ku dira, ilaa canshuuraha, maabyo iyo diiwaanada maxkamadda.

www.english-heritage.org.uk

10 milyan sawiro, dokumentiyo, qorshooyin iyo warbixino ku saabsan taariikhda Ingiriiska.

www.direct.gov.uk/en/HomeandCommunity

Ka buuxa talo iyo meelo laga galo bogag kale ku saabsan qoys, baarista taariikhda deegaanka iyo guriga, ururyo deegaan ee waxtar leh, koorsooyin iyo wax ka badan.

www.24hourmuseum.org.uk

Warar, liisas iyo macluumaad kale ee laga keenay 3,000 maktabado ku yaala dalka Ingiriiska. Bogga internetka wuxuu xittaa qabaa isku xir kugu xiraayo mawduucyo gaar ah, ee ku siinaayo macluumaadyo iyo sawiro.

BUUGAAGTA TAARIIKHDA DEEGAANKA

Local History: A Handbook for Beginners oo qorey Philip Riden

Tracing the History of Your House: The Building, the People, the Past oo qorey Nick Barratt

How to Research Local history: Find out All About Your House, Village or Town oo qorey Pamela Brooks

Readers Digest Local History Detective: Explore Your Landscape, Your community and Your Home oo qorey Readers Digest.